

**WARQADDII  
LABAAD EE RASUUL**  
**YOOXANAA**

**Runta Iyo Jacaylka**

**1** <sup>1</sup>Anigoo odayga ah waxaan salaamayaan marwada la doortay iyo carruurteeda aan runta ku jeclahay, keligayna ma ahaye, laakiin xataa waxaa jecel kuwa runta yaqaan oo dhan, <sup>2</sup>runta inagu dhex jirta, weligeedna inagu dhex jiri doonta aawadeed. <sup>3</sup>Nimco iyo naxariis iyo nabad ka yimaada Ilaha Abbaha ah iyo Ciise Masiix oo ah Wiilka Abbaha ayaa inala jiri doona xagga runta iyo jacaylka.

<sup>4</sup>Aad baan ugu farxay markaan arkay carruurtaadii qaarkood oo runta ku socda, waana sidaynu Abbaha amar uga helnay. <sup>5</sup>Oo haatan waxaan kaa baryayaa, murwoy, sidii anigoo aan kuu soo qorayn amar cusub laakiinse kii aynu tan iyo bilowgii haysannay, kaasoo ah inaynu isjeclaanno. <sup>6</sup>Tanu waa jacayl inaynu amarradiisa ku soconno. Amarkiina waa kan, waana sidaad tan iyo bilowgii u maqli jirteen inaad ku socotaan.

<sup>7</sup>Waayo, khaa'ino badan baa dunida u soo baxay, waana kuwa aan qiran in Ciise Masiix jidh ku yimid. Kaasu waa khaa'inka iyo ku Masiixa ka gees ah. <sup>8</sup>Iska jira si aydhaan u khasaarayn wixii aynu falnay, laakiinse si aad abaalgud dhan u heshaan. <sup>9</sup>Mid kasta oo dhaafa oo aan cilmiga Masiixa ku sii socon, kaasu Ilaha ma leh; laakiin kii cilmiga ku sii socdaa, Aabbaha iyo Wiilka labadaba wuu leeyahay. <sup>10</sup>Haddii nin idiin yimaado oo uusan cilmigan idiin keenin, gurigiinna ha soo gelinina, hana salaamina, <sup>11</sup>waayo, kii salaamaa, wuxuu ka qayb galaa shuquulladiisa sharka ah.

<sup>12</sup>In kastoo aan hayo wax badan oo aan idiin soo qoro, ma aan jeclayn inaan warqad iyo khad idiinku soo qoro; laakiinse waxaan rajaynayaa inaan idiin imaad oo aan afkayga idinkula hadlo, si ay farxaddiinnu u buuksanto.

<sup>13</sup>Carruurtii walaashaada la doortay way ku soo salaamayaan.